



## XAASHIDA XAQIIQADA

**Ma waxaad tahay mulkiile ama maareeye dhisme Seattle ku yaala oo leh meel ka weyn 20,000 (talaabo/feet) oo laba jibbaaran?** Sharciga Benchmarking ee Magaalada Seattle wuxuu kaaga baahan yahay inaad ka warbixiso isticmaalka tamarta dhismahaaga sanad kasta. Benchmarking waa cabbiridda iyo barbardhigista tamarta dhismahaaga dhismayaasha la midka ah, isticmaalkii hore, ama heerka waxqabadka tixraaca.

### **SIDA LOOGA WARBIXIYO ISTICMAALKA TAMARTA DHISMAHAAGA**

**Si aad u raacdo Sharciga Benchmarking Tamarta ee Seattle, waxa aad u baahan tahay:**

**Isticmaal** Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka (US EPA) ENERGY STAR® Portfolio Manager® qalab lagu cabbiro isticmaalka tamarta ee dhismayaashaaga. Waxa loo isticmaalaa in lagu soo sheego wadarta korontada, gaaska dabiiciga ah, uumiga iyo adeegyada kale. Si aad u isticmaasho qalabka/aaladda ENERGY STAR® Portfolio Manager®, waxaad u baahan doontaa cabbirka dhismahaaga, ciwaanka, goorta la dhisay, waxa loo isticmaalo, iyo inta dhismaha loo isticmaalo ujeedadaas.

**U sheeg** xogta isticmaalka tamarta dhismahooda oo dhan oo u gudbi Magaalada Seattle sanadkiiba ugu dambeyn 1'da Luulyo.

**Sii** warbixinta benchmarking-ga ee dhismaha kirayste kasta oo hadda ah ama mustaqbalka, iibsadaha, ama amaahiyaha maaliyadeed, haddii la codsado.

### **MAXAA LOO CABBIRAYAA ISTICMAALKA TAMARTA DHISMAHAAGA**

**Maxay tahay sababta ay magaalada Seattle ugu baahan tahay benchmarking?**

Isticmaalka tamarta dhismahaagu waa qayb ka mid ah qiiqa gaaska aqalka ee Seattle. Markaan cabbirno, waxaan hoos u dhigi karnaa saameynta magaaladeenna ku leedahay cimilada. Waa tan sida ay u caawiso:

- Waxay ku tusinaysaa sida wanaagsan ee dhismahaagu u isticmaalo tamarta iyo meesha aad tamarta ku badbaadin karto.
- Waxay siisaa ganacsiyada iyo macaamiisha macluumaad wanaagsan marka ay wax iibsanaan ama kiraysanaan.

- Waxay dhimaysaa kharashka tamarta waxayna yaraynaysaa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo.
- Waxay la socotaa sida Seattle ay uga shaqaynayso yaraynta isticmaalka tamarta iyo wasakhawga cimilada.
- Waxay ka caawisaa inay dadku rabaan dhismayaal tamar wanaagsan leh.

### **KA WARBIXINTA XOGTA KIREYSTAHAAGA**

**Sideen uga warbixiyaa isticmaalka tamarta kiraystahayga?**

Adeegyada Seattle (**Seattle City Light, Puget Sound Energy, iyo CenTrio Energy**) waxay si toos ah u bixiyaan ku-shubis isticmaalka tamarta dhismaha oo kooban la geliyo [Portfolio Manager]®. **Mulkiilayaasha waa in ay u soo gudbiyaan codsiga diiwaan gelinta qarashyada goobta si ay u helaan ku-shubista xogta ootamaatiga ah.**

### **XAQIJIINTA U-HOGAANSANAANTA**

**Sidee Seattle Ku Xaqiijisaa U Hogaansanaanta?**

Markaad cabbirto isticmaalka tamarta ee dhismahaaga ENERGY STAR® Portfolio Manager®, waxay ku siinaysaa laba lambar. EUI ayaa sheegaysa inta tamar ee hantidaadu isticmaasho. EUI hooseeya, ayaa ka sii fiican. Dhibcaha ENERGY STAR® wuxuu muujinayaa habsamida dhismahaagu. Dhibcaha sarreeya, ayaa ka sii fiican. Waxaan u baahanahay inaan aragno EUI-dhammaadka Dhiseembar si aan u hubinno inaad samaysay warbixintaada sanadlaha ah.

**Waxaan daabacnaa xogta u-hoggaansanaanta iyo warbixinnada Benchmarking Tamarta Seattle sanad walba.**

Waxaad ka arki kartaa xogtaada dhismaha[[seattle.gov/energy-gbenchmarkingmap](http://seattle.gov/energy-gbenchmarkingmap)].

**Wax badan ka ogow:** Booqo [ [Seattle.gov/energy-benchmarking](https://seattle.gov/energy-benchmarking) ] oo guji **tilmaamaha** sida loo cabbiro hagayaasha iyo fiidiyowyaada.

**CAAWIMAAD BILAASH AH OO LA HELI KARO:** Ma rabtaa macluumaad dheeraad ah oo luuqaddaada ah?

[ [energybenchmarking@seattle.gov](mailto:energybenchmarking@seattle.gov) ] ama [206-727-8484]

WAC ama IIMEEL-GAREEH si aad u codsato macluumaad la turjumay ama caawimaada luuqaddaada.



**Seattle**  
Office of Sustainability  
& Environment